

## LA OGAYSIIYA SHARAFTA LEH

Waxa aanu doonaynaa in dhamaan dadka Finland ku nool oo odhan aan gaadhsiino wararka runta ah ee ku saabsan cudurka korona fayraska. Cudurka korona fayraska waxa uu keenaa xanuun la magac baxay covid -19. Waxa aan warqadan iduunku soo tabinaynaa, sida laysaga ilaaliyo qaaditaanka cudurka. Waxa aanu sidoo kale ka waramaynaa sida loo daweeyn karo cudurka.

Cudurka korona fayraska waxa uu dowlada Finland geliya heegan culus. Waxa maanta inoo dan ah, in aynu joojino faafitaanka cudurka oo aan sidoo kale ka ilaalino dadka uu kharta ku keeni karo.

### Warqadan waxa ku qoran arimahan:

- Sidee ayaa looga hortagi karaa sii faafitaanka cudurka korona fayraska?
- Maxay ayaad samaynaysaa hadii uu cudurku adiga ama qof ehelkaa ah ku dhaco?
- Maxaa lagaa rabaa in ay sameeyaan dadka 70 jirka ka wayn?

Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan cudurka korona fayraska waxa aad la soo hadli kartaa lambarkan 0295 535 535. Waxa taleefanka lala soo hadli karaa maalmaha shaqada sacadaha 8:00–21:00. Sabtidana sacaada 9:00–15:00. Luuqadaha taleefankani laguugu jawaabayaa waa Af-Fiinish, Af-Iswiidhish iyo Af-Ingiriisi

### Faahfaahin dheeraad ah

Cudurka korona fayraska dardii ayaa xilhayahayaasha xafiis-dawladeedku codsanayaan, in dadku ay isticmaalaan macluumaadyada aaladaha internetka.

Aalada shabakada internetka ee [www.omaolo.fi](http://www.omaolo.fi) Waxa laga furay macluumaad su'aalo ku waydiinaya oo ansixinaya, in aad cudurka korona fayraska qabto iyo in kale, hadii aad shakido. Marka aad bogga internetka ee qaybtiisa su'aalaha gasho, waxa ku hagaya su'aalaha oo kuu sharxaya waxa ay tahay in aad samayso. Su'aaluhu waxay ku qoran yihiin Af-Fiinish iyo Af-Iswiidhish.

Warbixinta dheeraadka ee macluumaadka xafiis-dawladeedka, sida tusaale ahaan isgaadhsiinta macluumaad-adeegga caafimaadka waxa aad ka helaysaa goobtan [www.suomi.fi](http://www.suomi.fi)- shabakada internetka.

### Wasaarada arimaha bulshada iyo caafimaadka

(sosiaali- ja terveystieteiden ministeriö)